Medicaid ayaa isbeddelaya 1 Oktoobar 2026 dadka waaweyn ee aan muwaadiniinta ahayn qaarkood, sababoo la xiriira Isbeddellada sharciga Dowladda dhexe (Federaalka)

Dadka qaarkood waxay lumin doonaan caymiska. Ogoow in arrintani adiga ku khusayso iyo in kale.

Tani ma i saamaynaysaa?

Medicaid waad sii haysan doontaa haddii aad tahay:

• Muwaadin Marekan ah ama qof u dhashay Mareykanka (U.S. citizen/national)
• Muhaajiriinta ka yimid wadamada COFA (COFA migrant)
• Qof ka yimid Kuuba/Haiti oo dalka soo galay (Cuban/Haitian Entrant)
• Haweenka uurka leh
• Carruurta ka yar 19 sano jir
• Qof haysta Sharciga Deganaanshaha Joogtada ah (Green card holder)
- Kuwa haystay sharciga deganaanshaha (green card) muddo 5 sano ah
- Ama kuwa ka reebban muddada sugitaanka ee 5-ta sano ah

Waxaa laga yaabaa inaad lumiso Medicaid haddii aad tahay:

- Qaxooti ama qof magangelyo haysta oo aan haysan kaarka cagaaran
- Qof si ku-meel-gaar ah loo oggolaaday inuu joogo (Parolee)
- Qof ka badbaaday ka ganacsiga dadka ama xubin qoyskiisa ka mid ah
- Qof kiiska socdaalkiisu weli sugayo go'aan

Sidee ku ogaan doontaa inaad sii haysanayso ama luminayso caymiska?

- Maamulka DHHS ee Nebraska waxay dib u eegis ku samayn doonaan kiiskaaga.
- DHHS ayaa kuu soo diri doonta warqad haddii ay u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama Medicaid-kaagu dhammaanayo.
- Warqaddu waxay kuu sheegi doontaa waxa aad u baahan tahay inaad samayso.

Haddii aad uur leedahay:

599 CHIP waa barnaamij loogu talagalay dadka uurka leh ee aan haysan caymis caafimaad, kaas oo daboola daryeelka uurka iyo dhalmada.

Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg ah:

Barnaamij la yiraahdo EMSA ayaa kaa caawin kara bixinta daryeelka qolka xaaladaha degdegga ah. Ma bixiyo booqashooyinka dhakhtarka ee caadiga ah ama daryeelka joogtada ah.



Halkan iskaanka ku samee si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

Omaha Refugee Task Force

Bogga dambe u rog si aad u hesho macluumaad iyo ilo dheeraad ah.

Waxa aad hadda samayn karto:



Cusboonaysii macluumaadkaaga xiriirka ee DHHS

Cusboonaysii macluumaadkaaga adigoo isticmaalaya cinwaanka iyo lambarka telefoonka ee hadda.

- Booqo iserve.nebraska.gov
- Wac 855.632.7633
- Booqo xafiiska DHHS ee deegaanka.



Fur dhammaan waraaqaha DHHS

DHHS waxay kuugu soo diri doontaa warqad boostada:
• Haddii ay u baahan yihiin macluumaad dheeraad ah, ama
• Haddii ay caymiskaaga Medicaid uu dhammaanayo

Fur warqad kasta oo raac waxa ku qoran isla markiiba.



Ku wargeli DHHS wixii isbeddel ah

Soo sheeg haddii xaaladdaadu is beddeshay oo hadda aad tahay muwaadin Maraykan ah; degane rasmi ah oo sharci ah; qof ka soo galay Cuba ama Haiti; muhaajir COFA; ama aad uur leedahay.

Wac DHHS lambarka 855.632.7633 ama booqo xafiiska DHHS ee deegaanka adigoo wata macluumaadkaaga cusub.

Haddii aad weydo Medicaid, weli waad heli kartaa daryeel caafimaad:

Raadi xarun caafimaad oo kuu dhow. Xarumahani waxay bixiyaan adeegyo caafimaad, ilkaha iyo caafimaadka hab-dhaqanka oo bilaash ah ama qiimo jaban: hcanebraska.org/health-centers/find-health-center/

- **Xarumaha Caafimaadka Bulshada ee OneWorld: 402.734.4110**
- **Xarunta Caafimaadka Charles Drew: 402.451.3553**

Rugahan sidoo kale waxay bixiyaan daryeel caafimaad oo bilaash ah ama qiimo jaban gudaha aagga Omaha:

- Healing Gift Free Clinic at Kountze Commons: 402.614.4357 - then press 1
- **Heart Ministry Center Monen Healthcare Clinic:** 402.932.4887
- **Methodist Community Health Clinic:** 402.354.3198
- **Magis Clinic:** 402.881.0143
- **SHARING Clinic:** 402.559.7200 - ask for the Sharing Clinic or “free clinic”

Hel macluumaad iyo caawimo:

Wac Medicaid-ka Nebraska: 1.855.632.7633 ama 402.595.1178 gudaha Omaha
Booqo xafiiska DHHS ee deegaanka: https://dhhs.ne.gov/Pages/Public-Assistance-Offices.aspx
Wac Khadka Macluumaadka Waaxda Caafimaadka Degmada Douglas: 402.444.3400. Turjubaano ayaa diyaar ah.

Omaha Refugee Task Force

Halkan ka skan garee si aad u hesho xarun caafimaad oo ku dho.